Washington State Health Care Authority

# Sidee loo isticmaalaa adeegaha (Medicaid) ee Apple Health iyo ceymiska caafimaadka khaaska ah si aad u qaadatid daryeelka caafimaadka

Su'aal: **Haddii Aan qabbo ceymis khaas ah, malaga yaabaa in ay Apple Health weli i caawiso?**
Jawaab: Haa. Adiga oo lahaysta Apple Health ceymiskaaga khaaska ah waa mid aad u wanaagsan. Intiiba aad u qalanto ceymiska Apple Health, waxaa dhici karta in aynu bixino wada-bixino, jeritaano iyo adeegaha aan ceymis gelin ceymiskaaga.

Su'aal: **Haddii Aan haysto dhammaan ceymiska khaaska ah iyo Apple Health maxaan u sheegayaa dhakhtaradayda ama caafimaad bixiyaal kale?**
Jawaab: Muhiim ayay tahay in aad aadid caafimaad bixiyaasha kuwaas oo qaadan doona dhammaan Kaarka Adeegaha ceymiskaaga khaaska ah iyo Apple Health (sidoo kale lagu magacaabo kaarka adeegaha ProviderOne) iyo/ama kaarkaaga qorshaha Apple Health.Marka aad aadid dhakhtarkaaga ama caafimaad bixiy(aal) kale, tusi **dhammaan kaararkaaga ay ku jirto** kaarka ceymiska caafimaadka khaaska ah, kaarkaaga adeegaha Apple Health iyo kaarka qorshaha caafimaadka, haddii laguugu qoray qorshe daryeel la maamulay.. Haddii caafimaad bixiyahaaga aan ogolaanin ceymiskaaga iyo Apple Health, waxaad masuul ka ahaan doontaa waxkasta oo daryeel caafimaad ah oo aad qaadato.

Su'aal: **Maxaan sameynayaa haddii dhakhtaradayda ama caafimaad bixiyaasha kale dhahaan in aysan qaadanayn Kaarka Adeegaha ama ceymiska khaaska ah?**
Jawaab: Waxaa khasab kugu ah in aad raadisid caafimaad bixiyaal kuwaas oo ogolaan doona dhammaan kaarkaaga Apple Health iyo ceymiskaaga khaaska ah. Waxaad u baahnaan doontaa in aad wacdid shirkadaada ceymiska si aad u heshid caawimaad laguugu caawiyo helida caafimaad bixiyaasha deegaankaaga jooga:

- Haddii daryeel bixiyahaaga aan aqbalin Apple Health (ay ku jirto qorshooyinka daryeelka la maamulay ee qandaraaska lagala galay Apple Health), waxaad u baahnaan doontaa in aad heshid daryeel bixiye midaas aqbala haddii kale adiga ayaa masuul ka noqonaya wax kasta oo lacag-wada bixin ama lacag jeritaan ah.
- Haddii daryeel bixiyahaaga aqbalo Apple Health, laakiin aan kamid ahayn qorshaha daryeelka la maamulay ee aad ku qorantahay:
  - Daryeel bixiyaha wuxuu dooran karaa in uu bixiyo biilka qorshaha daryeelka la maamulay,
  - Waxaad u baahnaan kartaa in aad raadisid daryeel bixiye kale: ama
  - Waxaad codsan kartaa in aad bedeshid qorshahaaga daryeelka la maamulay oona loo bedelo qorshaha uu aqbalo daryeel bixiyahaaga.

Su'aal: **Maxaa dhacaya haddii ceymiskayga khaaska ahi uusan ceymis gelin adeega?**
Jawaab: Dhakhtarkaaga ayaa bixin doona biilka ceymiska marka hore. Haddii adeega aan laga ceymis gelin dhinaca ceymiskaaga laakiin laga ceymis geliyay dhinaca Apple Health, waxay biil u bixin doonaan Apple Health ama qorshaha daryeelka la maamulayor si ay lacagta u bixiyaan. Si aad u hubsatid in aysan jirin wax mushkilado ah, iska hubso in aad u qaadatid Kaarkaaga Adeegaha Apple Health iyo kaarkaaga qorshaha caafimaadka.

Su'aal: **Maxaan u baahanahay in aan sameeyo si aad u bixisid lacagaha bilaha ceymiskayga caafimaadka?**
Jawaab: Nasoo wac. Waxaan u baahnaan doonaa macluumaad kusaabsan ceymiskaaga caafimaadka, tirada lacagtaada bilaha ah, marka la iska rabbo iyo haddii adiga ama qofka aad u shaqaysid uu bixiyo lacagta ceymiska bilaha ah. Marka aynu helno macluumadaan waxaan kuu ogolaan doonaa in aad ogaatid haddii aynu bixin karno lacagtaada ceymiska iyo haddii kale.

Su'aal: **Mala I weydiin doonaa in aan bixiyo farqiga u dhaxeeya waxa Apple Health ay bixiso iyo waxa caafimaad bixiyahayga biil ahaan iiga qaato?**
Jawaab: Maya. Marka dhakhtarada iyo caafimaad bixiyaasha kale ay lashaqeeyaan Apple Health, waxay ogolaanayaan in ay qaataan waxa ay bixiso Apple Health mana kaa qaadanayaan lacag biil ah adiga waxkasta oo farqi ah oo ay noqoto. Haddii aad hesho biil lacag lagaaga dalbanayo, noo soo wac si dhakhso ah. Malagaaga qaadanayo lacag biil ah adeega lagu ceymis geliyay Apple Health.

Su'aal: **Maxaa dhacaya haddii uu dhammaado ceymiskayga khaaska ah ama isbedelo?**
Jawaab: Waa muhiim in aad wacdid qorshahaaga daryeelka la maamulay oona soo sheegtid wax kasta oo isbedel ah oo ku dhaca ceymis ku jirida ceymiskaaga khaaska ah.Waxay dib u cusboonaysiin doonaan faylkaaga adigana waxaad kasii qaadan doontaa daryeelka caafimaadka tooska Apple Health intiiba aad tahay qof u qalma middaas.

Su'aal: **Haddii aan qabbo ceymis daryeel muddo-dheer ah (LTC), matahay Apple Health mid weli isii caawinaysa?**
Jawaab: Haa. Apple Health waxay kugu caawineysaa in ay kaabixiso qiimooyinkaaga ceymiska daryeelka muddada-dheer marka aad degantahay guri adiga iska leedahay, xarun caawimaad noolaansho, guri qoys dad waaweyn, ama xarun kalkaalinimo haddii ceymiskaaga daryeelka muddada-dheer uusan bixin dhammaan qiimooyinka. Haddii ceymiska kuugu bixiyo sitoos ah waxaa khasab kugu ah in aad u dirtid jeegaga lacagta xarunta bixisa daryeelkaaga.

Su'aal: **Maxaan u haysanayaa ceymiskayga daryeelka muddada-dheer haddiiba Aan u qalmo Apple Health?**
Jawaab: Majirto dammaanad caddeynaysa in aad ahaanaysid marwalba qof u qalma ceymiska Apple Health. Waxaa dhici karta in aad heshid ilooyin dakhli oo dheeri ah ama hanti middaas oo sabab u noqon karta in u qalmidaada lajoojiyo ama waxaa dhici karta in sharci-dejiyaasha ay yareeyaan maal gelinta loogu talogalay barnaamijta qaarkooda. Haddii aad burisid ceymiskaaga daryeelka muddada-dheer waxaa dhici karta in aadan u qalmin in aad dib u qaadato. Dheefaha ceymiska daryeelka muddada-dheer sidoo kale waxay yareyn doontaa wax kasta oo waajibaad ah oo kasoo horjeeda hantidaada maguurtaanka ah marka aad dhimatid.

Su'aal: **Maxaad ugu baahantahay Lambarka Dammaanada Bulshada?**

Jawaab: Sharciyadaan dowlada waxay sheegaan in qofkasta oo codsanaya dheefaha loogu talogalay Medicaid ay khasab kutahay in uu bixiyo Lambarka Dammaanada Bulshada (42 USC 132b-7(a), 42 CFR 435.910, 42 CFR 435.920, iyo 42 CFR 457.340(b).). Xeerarkaan waxay nagu caawinayaan in aynu hubsano in aynu kusiino tirada dheefaha saxda ah iyo in lasoo celiyo lacagta haddii aynu bixiney dheefo dheeri ah.

Su'aal: **Maxaan sameynayaa haddii aan qabbo su'aalooyin kale?**

Jawaab: Haddii aad qabtid su'aalooyin kusaabsan ceymiskaaga caafimaadka khaaska ah, u wac qorshahaaga sitoos ah. Wixii kusaabsan caawimaad dheeri ah oo ah sida loo isticmaalo Kaarka Adeegaha ee ceymiskaaga khaaska ah, naga soo wac lambarka hoos kuqoran.

**Isku duwida Dheefaha TELEEFOONKA LACAG LA'AANTA AH 1-800-562-3022**
**Asniin-Jimco: 7:00 subaxnimo – 5:00 galabnimo**

Washington State Health Care Authority

## Macluumaada Ceymiska Caafimaadka

**MACLUUMAAD MUHIIM AH:** Ujeeddada foomkaan waa in la ogaado haddii aad qabtid ceymis caafimaad khaas ah. Waxaad lahaan kartaa ceymis khaas ah welina waxaad ceymis uga jiri kartaa dhinaca Apple Health (Caawimaad caafimaad). Marka aad buuxisid foomkaan, fadlan kusoo celi bakhshada lasoo lifaaqay dhinaca Health Care Authority, PO Box 45565, Olympia, WA 98504-5565. Haddii aad qabtid su'aalooyin kusaabsan foomkaan, fadlan wac lambarkaan 1-800-562-3022 .

| Magaca Macmiilka | Taariikhda | Lambarka Teleefoonka | Taariikhda Dhallashada | Aqoonsiga Macmiilka ACES# |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |

A. Mahaysataa ceymis kujirid caafimaad (ay kujirto dheefaha Ciidan)? ☐ Haa ☐ Maya

B. Mahaysataa ceymis kujirid ilkaha ah? ☐ Haa ☐ Maya

C. Mahaysatey 12 kii bilood ee lasoo dhaafay ceymiska ilkaha ah ama caafimaad? ☐ Haa ☐ Maya

D. Mahaysataa ceymiska Daryeelka Muddada Dheer (LTC)? ☐ Haa ☐ Maya *Haddii ay haa tahay, fadlan sheeg ceymis kujirida aad haysatid:* ☐ Guri Kalkaalinimo ☐ Caawimaad Noolaansho ☐ Guri Qoys Dadka waaweyn ah ☐ Daryeelka Guddaha-Guriga ☐ Waxkale: ____________________

**Haddii aad dooratay Haa mid kamid ah alaabta kore, fadlan dhammeystir inta soo socota ee loogu talogalay siyaasada ceymis kasta (fadlan isticmaal boggag dheeri ah haddii aad u baahatid):**

| 1. Nooca Siyaasada: ☐ Caafimaad ☐ Ilko ☐ Daryeel Muddo Dheer | | Qor qofka lagu ceymis geliyay siyaasadaan (isticmaal warqad dheeri ah haddii aad u baahatid) | Magaca | Taariikhda Dhallashada |
|---|---|---|---|---|
| Magaca Ceymiska | | Lambarka Teleefoonka | 1. | |
| Cinwaanka (sida uu ugu qoranyahay kaarkaaga) | | | 2. | |
| Lambarka Siyaasada | Taariikhda Bilaabashada Siyaasada | Taariikhda Dhammaadka Siyaasada | 3. | |
| Magaca Qofka Rukunka ah | Taariikhda Dhallashada Qofka Rukunka ah | | 4. | |
| Qofka looshaqeeyo | Magaca Ururka iyo Lambarka Gudaha, Haddii Lahelaayo | | 5. | |

| 2. Nooca Siyaasada: ☐ Caafimaad ☐ Ilko ☐ Daryeel Muddo Dheer | | Qor qofka lagu ceymis geliyay siyaasadaan (isticmaal warqad dheeri ah haddii aad u baahatid) | Magaca | Taariikhda Dhallashada |
|---|---|---|---|---|
| Magaca Ceymiska | | Lambarka Teleefoonka | 1. | |
| Cinwaanka (sida uu ugu qoranyahay kaarkaaga) | | | 2. | |
| Lambarka Siyaasada | Taariikhda Bilaabashada Siyaasada | Taariikhda Dhammaadka Siyaasada | 3. | |
| Magaca Qofka Rukunka ah | Taariikhda Dhallashada Qofka Rukunka ah | Lambarka Dammaanada Bulshada Qofka Rukunka ah | 4. | |
| Qofka looshaqeeyo | Magaca Ururka iyo Lambarka Gudaha, Haddii Lahelaayo | | 5. | |

| 3. Nooca Siyaasada: ☐ Caafimaad ☐ Ilko ☐ Daryeel Muddo Dheer | | Qor qofka lagu ceymis geliyay siyaasadaan (isticmaal warqad dheeri ah haddii aad u baahatid) | Magaca | Taariikhda Dhallashada |
|---|---|---|---|---|
| Magaca Ceymiska | | Lambarka Teleefoonka | 1. | |
| Cinwaanka (sida uu ugu qoranyahay kaarkaaga) | | | 2. | |
| Lambarka Siyaasada | Taariikhda Bilaabashada Siyaasada | Taariikhda Dhammaadka Siyaasada | 3. | |
| Magaca Qofka Rukunka ah | Taariikhda Dhallashada Qofka Rukunka ah | Lambarka Dammaanada Bulshada Qofka Rukunka ah | 4. | |
| Qofka looshaqeeyo | Magaca Ururka iyo Lambarka Gudaha, Haddii Lahelaayo | | 5. | |

## Barnaamijka Bixinta Lacagta Ceymiska

Haddii aad qaadanaysid ceymis kujirida Apple Health, qabtid ceymis caafimaad khaas ah oona jeceshahay in laguugu caawiyo lacagaha ceymiska bilaha ah, fadlan soo wac lambarkaan 1-800-562-3022 x15473 ama buuxi foomkaan, "Codsiga loogu talogalay Barnaamijka Bixinta Lacagta Ceymiska Maamulka Daryeelka Caafimaadka" (HCA 13-705) si loo arko haddii aad u qalantid. Waxaad sitoos ah uga heli kartaa foomka boggaan internetka www.hca.wa.gov/assets/free-or-low-cost/13-705.pdf

## Macluumaada Shilka ama Dhaawaca

| | |
|---|---|
| Matahay adiga ama qofka aad u codsanaysid mid kudhacday shil u baahan daryeel caafimaad gudaha 3 dii sanno ee lasoo dhaafay? ☐ Haa ☐ Maya | Taariikhda Shilka |

Ma ahaa shilka mid sabab u ah:
☐ Baabuur ☐ Goobta Shaqada (L&I) ☐ Xirfad xumo ☐ Dhaawac Shakhsiyeed oo kadhacay meesha Ganacsiga ama Guri Qofkale
☐ Khalad alaab ☐ Fal Dembiyeed ☐ Waxkale: ____________________________

### Haddii aad dooratey baabuur, fadlan buuxi inta kaharsan qaybtaan

Meesha uu Shilku kadhacay (Waddada/Isgoyska waddada, Magaalada, Degmada, iyo Gobolka)

Matahay shirkada ceymiska mid kulug leh? ☐ Haa ☐ Maya

Magaca qofka Laceymis geliyay

| | |
|---|---|
| Magaca Ceymiska | Cinwaanka Ceymiska |
| Lambarka Sheegashada | Lambarka Siyaasada |
| Magaca Shaqaalaha | Lambarka Teleefoonka Shaqaalaha |

| Magacyada Qofka ama (Dadka) Kudhaawacmay Shilka (Isticmaal warqad dheeri ah haddii aad u baahatid) | Dhaawacyada |
|---|---|
| 1. | |
| 2. | |
| 3. | |
| 4. | |
| 5. | |

Matahay mid kulug leh qareen? ☐ Haa ☐ Maya

| Magaca Qareenka | Lambarka Teleefoonka Qareenka | Cinwaanka Qareenka |
|---|---|---|
| | | |

Aniga waxaan halkaan ku ogolaanayaa sii deynta waxkasta oo xiriir la leh macluumaada lagama maarmaanka ah ee khuseysa ceymis kujirida waxkasta oo siyaasad ceymis ah middaas oo Aan ahay kafaa'ideystaha ama qofka helaya ceymis kujirida, kaqaata dhinaca Maamulka Daryeelka Caafimaadka loogu talogalay u jeeddada iskuduwida dheefaha caafimaadka. (WAC 182-503-0540)

| Sixiixa | Taariikhda |
|---|---|
| | |